


Karantiil miyaa lagu galiyay?

Waxaad xaq u yeelan kartaa lacagta gunnada cuddurka faafa.

Waxaad xaq u yeelan kartaa lacagta gunnada cuddurka faafa hadii lagu faray inaad karantiil rasmi ah gasho oo aadan shaqeyni Karin. Intaas waxaa dheer, waa inaad Kujirtaa ceymiska Finnish social security system (Nidaamka amniga bulshada ee Finland).

Karantiilka rasmiga ah macnihiisu waa in go'aanka laguugu geliyay karantiilka uu gaaray dhakhtar mas'uul ka ah xakameynta cuddurka faafa. Waxaa lagu gelin karaa karantiil xitaa hadii aadan muujin wax calaamado cudurka ah. Inaad is-karantiisho ayaa laga yaabaa tusaale ahaan hadii lagaa baaray coronavirus oo aad sugeeyso natiijoyinkaaga. Lacagta gunnada cuddurka faafa lama helo xilliga lagu jiro is-karantiilka. Inta aad ku jirto karantiilka iyo is-karantiilka, iska ilaali inaad cidna kula kulanto guriga wixi ka baxsan.

Lacagta gunnada cuddurka faafa waxay la'eg tahay mushaharki lagu siin lahaa hadii aad shaqeenlahayd. Haddii aad tahay qof iskii u shaqeysta, lacagtaada gunnada waxaa lagu xisaabin doonaa iyada oo lagu saleynayo ceymiskaaga YEL (Shaqsiyaadka Iskood u Shaqeysta) ama MYEL (Beeraleyda). Inta aad halki maalin helyso waxaa lagu xisaabinayaa iyada oo 300 loo qeybinayo dakhligaaga sanadlaha ah sida ku xusan ceymiska YEL ama MYEL laga soo bilaabo maalinta koowaad ee lacagta gunnada.



Xaaladaada	Xaalada karantiilka	Xaq ma u leeyahay lacagta gunnada ee cuddurka faafa?	Sida loo codsado	Dukumiintiyada la raaciyo codsiga
Waxaa laiga baaray coronavirus waxaana sugayaa natiijoyinkeeyga	Is-karantiil	Maya		
Natiijada baaritaankeeyga waxay noqotay in cuddurka laiga helay	Karantiilka rasmiga ah	Haa	kela.fi/asiointi ama foomka SV 8e	Amarka karantiilka
Waxaan leeyahay calaamado kuwa hargabka oo kale ah	Is-karantiil	Maya		
Waxaa isoo garay coronavirus	Karantiilka rasmiga ah	Haa, hadii aadan shaqeyni karin	kela.fi/asiointi ama foomka SV 8e	Amarka karantiilka
Waxaan ku jiraa karantiil kadib markaan safar dibadda ugu baxay	Omaehtoinen	Maya		
Loo-shaqeeyaheeyga wuxuu iishegay inaan shaqada iskaga joogo	Maya*	Maya		
Xaaskeyga/seeygeyga ama lammaanaheeyga ayaa karantiil la galiyay	Maya	Maya		
Cunugeyga wuxuu ka yaryahay 16 jir waxaana la geliyay karantiil rasmi ah	Maya**	Haa, hadii aadan shaqeyni karin	kela.fi/asiointi ama foomka SV 8e	Amarka karantiilka
Waxaan guriga u joogaa inaan daryeelo cunugeyga oo iskuulkiisa ama xaruntiisa xannaanada carruurta la xiray	Maya	Maya		
Waxaa lai geliyay karantiil rasmi ah, basle waxaan ka soo shaqeeyaa meel xafiiska ka baxsan	Karantiilka rasmiga ah	Maya		
Waxaan ahay ardey ama shaqa la'aan, waxaana lai geliyay karantiil rasmi ah	Karantiilka rasmiga ah	Maya	Haa***	kela.fi/asiointi ama foomka SV 8e
Waxaan u shaqeysta iskeey, waxaana lai geliyay karantiil rasmi ah	Karantiilka rasmiga ah	Haa	kela.fi/asiointi ama foomka SV 8e	Amarka karantiilka

*Soo jeedinta ama amarka loo-shaqeeyaha ee ah in guriga la joogo

**Cunug la geliyay karantiilka rasmiga ah

***Haddii aad shaqeytid maalinta niskeeda oo aad la kulantay khasaare dakhli ah



Macluumaad dheeraad ah:
kela.fi

Kela